Kidsafe Western Australia
CHILD ACCIDENT PREVENTION FOUNDATION OF AUSTRALIA

fact sheet

# Hubinta Amaanka Guriga



## BAY'ADA GURIGA

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Ma jiraa qalabka lagaga hortago argagaxa korontadu samayso? | ☐ | ☐ |
| Biyaha kulul ee musqushaadu ma garaan ugu badnaan 50$^0$c? | ☐ | ☐ |
| Ma leedahay alaarmiga dabka sheega oo ku yaalla meelaha la seexdo iyo guriga intiisa kale? | ☐ | ☐ |
| Ma ku xiran yahay qalabka amaanka bartada xoogga korontada? | ☐ | ☐ |
| Ma goysay guriga dhirta ka baxda oo sunta noqon kara? | ☐ | ☐ |
| Waa sidee xaallada qalabka korontada, meelaha gelanayo iyo fiilladu? | ☐ | ☐ |
| Fiilada dheer ma la isku laabay mase inta siyaadada ahi waa iska daadsan tahay? | ☐ | ☐ |
| Kulayliyaha iyo marawaxada wax lagu beegay, kandhaladana la ilaaliyey? | ☐ | ☐ |
| Ma lagu xiray joojiye ama deyr wadada, jaranjarada iyo meelaha la isku bedelayo ee dabaqa si aan loo dhicin? | ☐ | ☐ |
| Meelaha la cuskado ma laga ilaaliyey meel wax qabsata oo fuulli karto? | ☐ | ☐ |
| Alaabta culus sida khaanadaha buuggta, khaanada carruurta, telefishanka iyo TV la gelayo si fiican derbiga ma u haystaan si aanay u soo dhicin haddii carruurtu fuusho? | ☐ | ☐ |
| Meesha lagu dabaasho ama isbaagu si fiican ma loogu wareejiyey deyrka amaanka, kaas oo leh deyr isagu is xiraya? | ☐ | ☐ |
| Dhulka iyo meelaha biyuhu ka galaan ma laga saaray ma laga qaaday waxyaallaha guban kara? | ☐ | ☐ |
| Ma leedahay qorshaha dab ka caririda? | ☐ | ☐ |



## Goobta Qubayska (BATHROOM)

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Qolka qubayska ma yaallin wax aan lagu siibanayn iyo wax la cuskado? | ☐ | ☐ |
| Daawada iyo waxa wax gooya, (sida garxiirta), ma lagu xereeyey meel aan carruurtu gaarin? | ☐ | ☐ |
| Timaqalijiyaha iyo garxiirta korontada ah ma laga saaray korontada markaan la isticmaalayn? | ☐ | ☐ |
| Daawada ma la geliyey meel xirmaysa? "Xiran oo fog" | ☐ | ☐ |
| Musqusha iyo qolka qubaysku ma leeyihiin aalad aan carruurtu furi karin? | ☐ | ☐ |
| Kulaylka biyaha had iyo jeer ma la "hubiyaa" intaan ilmaha lagu ridin (ku bilaw qabow, dabadeedna kulayl, kuna dhamay qabow? | ☐ | ☐ |
| Shaambada, saabuunta iyo qalabka qurxinta ma la dhigaa meel carruurtu aanay gaarin? | ☐ | ☐ |

SGIO

*Proudly Supporting Kidsafe WA*



## Jikada (KITCHEN)

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Qalabkaaga ma leeyihiin fiilo gaaban oo aan ka soo degayn ama dhacayn miiska jikada? | ☐ | ☐ |
| Kirliga carruurtu ma gaartaa? | ☐ | ☐ |
| Microwayfka ma la dhigay meel aan carruurtu gaarin? | ☐ | ☐ |
| Ma isticmaashaa digsi dabadeedna ma leexisaa halka la qabto si looga hortago in ilmuhu soo jiido digsiga? | ☐ | ☐ |
| Kuwa sigaarka lagu daaro, kibriidka, mindida iyo waxyaallaha kale ee khatarta ah ma la dhigaa meel carruurtu aanay gaarin? | ☐ | ☐ |
| Bacaha ma la dhigaa meel carruurtu aanay gaarin ama dhexda ma laga xiraa? | ☐ | ☐ |
| Ma ku leedahay meel lagu xiro albaabka armaajada iyo halka qalabka lagu xereeyo? | ☐ | ☐ |
| Kursiga dheeri si fiican ma u taagan yahay oo dheelitiran yahay? | ☐ | ☐ |
| Ma leedahay bustaha dabka ama dab damiye diyaara si loo isticmaalo haddii dab dhaco? | ☐ | ☐ |
| Ma jiraa wax ka joojinaya ilmahaaga inuu galo jikada? | ☐ | ☐ |



## LAUNDRY

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Nadiifiyaha, kiimikooyinka wax lagu dhaqo ma la geliyaa armaajo aan carruurtu furi karin, "la xiray oo fog"? | ☐ | ☐ |
| Halka naabiga lagu rido ma la daboolaa mana la dhigaa meel carruurtu aanay gaarin? | ☐ | ☐ |
| Ma la faaruqiyaa mishiinka dhardhiqida iyo biyamareenka markaan la isticmaalayn? | ☐ | ☐ |
| Aalladaha daboolka leh ma furmaan marka la furo mishiinka? | ☐ | ☐ |
| Ma nadiifiya halka hawsku galo ee qalajiyaha mar kasta oo la isticmaalo? | ☐ | ☐ |
| Mar walba ma laga dhigaa dhulka mid qalalan oo aan lagu siiban? | ☐ | ☐ |



## QOLKA ILMAHA (CHILD'S BEDROOM)

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Sarriirta ilmuhu ma ka fog tahay dariishada? | ☐ | ☐ |
| Daaha ma laga fogeeyaa si aan loo gaarin (meel u dhow sariirta ilmaha)? | ☐ | ☐ |
| Ma kala durugsan yihiin biraha ku samaysan sarriirta 50-85 mm? | ☐ | ☐ |
| Wax kasta oo aan rabaa ma ku dhow yihiin miiska bedelida? | ☐ | ☐ |
| Tooyiska ma la dhigaa meel carruurtu gaari karto iyagoo aan fuullin? | ☐ | ☐ |
| Qalabka gurigu maka bedqabaan geesa wax goynaya? | ☐ | ☐ |
| Tooyiska ku haboon carruurta da'dooda (ma laga gooyey wixii ka lalmadey tooyiska) | ☐ | ☐ |
| Qalabka korontada iyo fiilooyinku ma yaalliin meel aan carruurtu yaryari gaarin? | ☐ | ☐ |
| Ma hubisay bustahaaga korontada ahi in aanu duqoobin ka hor inta aadan sarriirta ku rakibin? | ☐ | ☐ |
| Qalabka culus oo dhan sida khaanada armaajada dharka, ma lagu dhejiyey derbiga si looga hortago in aanay ilmaha ku soo dhicin haddii la fuullo? | ☐ | ☐ |



## MEELAHA LAGU NOOL YAHAY (LIVING AREAS)

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Miiska qarkiisa xanafta leh ma la daboolay? | ☐ | ☐ |
| Xargaha daaha carruurtu ma gaadhaa? | ☐ | ☐ |
| Albaabka galaaska ah ma daboolaa caaga amaanku, istiikariska midabka leh mase ka samaysan yahay galaaska amaanka? | ☐ | ☐ |
| Khamrada ma lagu xafidaa armaajada carruurtu aanay furi karin? | ☐ | ☐ |
| Tooyiska ma lagu xafidaa meel si sahala loo mari karo? | ☐ | ☐ |
| Dermooyinka iyo kaarbitka ma loo dhigay si aan keenayn dhicid (aan lagu siibanayn)? | ☐ | ☐ |
| Kuraasta iyo miisaska ma adag tahay in la isku laabo? | ☐ | ☐ |
| Sigaarka, aashteriga, iyo kibriitka ma la gaari karaa? | ☐ | ☐ |
| Miiska maro mayaa la saaraa mase gogol kale? | ☐ | ☐ |
| Cabitaanka kulul ma waxaa la dhigaa meel carruurtu gaarto? | ☐ | ☐ |
| Difaaca amaanku ma ku dhegan yahay derbiga ku wareegsan dabka, shidaalka istoofka iyo kulaylayaasha? | ☐ | ☐ |
| Kulayliyayaasha ma la dhigaa meel ka durugsan daaha, qalabka guriga iyo qalab kale oo guban kara? | ☐ | ☐ |
| Carruurtaadu ma waxay gashadaan keliya dhar khatartiisu hoosayso ama loogu talagalay in lagu yareeyo khatarta dabka? | ☐ | ☐ |




## HOOSADA JARDIINADA/GURIGA DIBADIISA (GARDEN SHED/OUTDOORS)

| | Haa | Maya |
|---|---|---|
| Dilayaasha cayayaanka, ranjiga, kiimikada, iyo sumaha kale waxaa lagu kaydiyaa meel aad loo daboolay, la calaamadiyey, weelasha asalka ah carruurtu ma gaarto ("xiran oo fog")? | ☐ | ☐ |
| Dhamaan qalabka beerta meel fog ayaa lagu xiraa? | ☐ | ☐ |
| Beertu maka reeban tahay dhirta sunta ah? | ☐ | ☐ |
| Hoosada ama garaashka ma la xiraa? | ☐ | ☐ |
| Agagaarku khatarta qarqida ma ka nabdoon yahay? Sida jidhaanta, weelka biyaha xayawaanka | ☐ | ☐ |
| Meesha lagu cayaaraa ma fog tahay halka guriga laga galo? | ☐ | ☐ |
| Qalabka cayaartu ma dheelitiran yahay mase fiican yahay? (dayactir joogta ah ayaa la rabaa) | ☐ | ☐ |
| Dhulka dushiisu jilicsan tahay haddii qalabka cayaarta laga soo dhaco? | ☐ | ☐ |
| Wadooyinku ma ka nabdoon yihiin jilaafada? | ☐ | ☐ |
| Laamuhu ma ku yaaliin meel ishu la siman tahay si looga fogaado dhaawac? | ☐ | ☐ |
| Xaallada beerta iyo wadada dhuuban mala shameeteeyey si khatarta looga fogaado? | ☐ | ☐ |
| Qalabka korontada, dab dhaliyaha iyo halka nalka laga damiyo banaanka ma u furan yihiin? | ☐ | ☐ |
| Dhamaan waxyaallaha guban kara si amaana ma loo xereeyey (sida awaamiirta waafaqsan)? | ☐ | ☐ |

**K afiirso inaad wax ka bedesho su'aallaha MAYA ah si guriga loo badbaadiyo!**
**Haddii aadan weli hubin gurigaaga ku gurguuro sidii ilmahaagu samayn lahaa si aad u aragto wax walba!**

# MACLUUMAAD INTAAS KA BADAN

***Haddii aad su'aal qabto, wac Kidsafe WA tel 9340 8509***
***Inta u dhexaysa 9subaxii 4galabtii Isniinta ilaa Jimcaha, ama booqo Kidsafe WA Safety House***
***(Godfrey House, Princess Margaret Hospital, Thomas Street, Subiaco)***

**www.kidsafewa.com.au** (Western Australia)
Kidsafe Western Australia website

**www.fesa.wa.gov.au** (Western Australia)
websaytka Hay'ada Adeega Xaalladaha degdegta ah

**www.docep.wa.gov.au/productsafety** (Western Australia)
Wax soosaarka Macluumaadka amaanka iyo Awoodgelinta

**www.sgio.com.au/homehelp** (Western Australia)
Sidaha SGIO Home Help wuxuu ka kooban yahay macluumaadka sida loo xaqiijiyo guriga amaankiisa

**www.kidsafe.com.au** (Australia)
Websaytka National Kidsafe

**www.inpaa.asn.au** (Australia)
The Infant and Nursery Products Association of Australia waxay siiyaan macluumaadkii ugu dambeeyey Jimciyadaha

**www.choice.com.au** (Australia)
Choice magazine online wuxuu ka kooban yahay natiijada tijaabooyinka iyo macluumaadka kale

**www.recalls.gov.au** (Australia)
wuxuu hayaa liiska badeecada dib loo soo celiyey sababa amaan dartood

**www.bubhub.com.au** (Australia)
Wuxuu siinayaa macluumaadka caafimaadka waalidiinta

**www.safekidscanada.ca** (Canada)
wuxuu ka kooban yahay macluumaadka ololaha National Safe Kids ee Canada

**www.cpsc.gov** (USA)
Guddiga Amaanka Cuntada Macmiilaha ee Maraykanka

**www.safekidsworldwide.com** (Caalami)
Wuxuu ka kooban yahay macluumaadka ololaha National Safe Kids ee Maraykanka.

**Kidsafe WA wuxuu jeclaan lahaa inuu aqoonsado ururada soo socda doorkooda dib u eegida Kidsafe liiska hubinta amaanka ee WA Home Safety:**

| FESA | SGIO | Department of Consumer and Employment Protection, Government of Western Australia |
|---|---|---|
| **FESA Community Safety Division** | **Community Department** | **Product Safety** |
| 480 Hay Street, Perth | 46 Colin Street, West Perth | 321 Selby Street, Osborne Park |
| PH: (08) 9323 9395 | PH: (08) 9264 2986 | PH: (08) 9282 4319 |
| www.fesa.wa.gov.au | www.sgio.com.au | www.docep.wa.gov.au/productsafety |

child safety is no accident